CAWADDARAN

©2023 Naasir Cali

Dhammaan xuquuqda sheekadani waxa leh qoraaga ku magacaaban. Lama daabici karo, qayb ka mid ah ama giddigeed, lama minguurin karo, hab electronic ah na looma faafin karo ayada oo aan qoraaga laga haysan oggolaansho qoran.

Kala xidhiidh qoraaga: +251902079620

CAWADDARAN

MAHADNAQ

Ugu horrayn waxa aan u mahadnaqayaa Eebbaha awoodda iyo maamulka adduunkani ba gacantiisa ku jiraan ee ii oggolaaday qoridda iyo farshaxamaynta sheekadan. Waxa kale oo aan u mahadcelinayaa labadayda waalid iyo saaxiibbadayda qaaliga ah ee marwalba iyo meel walba hiilka ila garab taagnaa. Saaxiibbadii igu qanciyay soosaaridda sheekada waxa aan leeyahay abaal ma guurta ah ayaan idiin hayaa. Saaxiibkay Dr Qodax Daa'uud oo tafaftirka iga gacansiiyay si gaara ayaan ugu mahadcelinayaa. Walaalkay Fu'aad Xaruur oo quraaridda iyo qabyatirka ba gacan weyn ku leh aad ayaan ugu mahandnaqayaa. Yacquub Dheeg, Cabdicasiis Darwiish iyo Akadamiyadda Qalindhuux na si mug iyo miisaan leh ayaan ugu mahadnaqayaa. Saaxiibkay Axmed Colhaye oo sameeyay cover-ka sheekada ayaa mahad aan duugoobin leh.

HIBAYN

Sheekadan waxa aan u hibaynayaa qof kasta oo jecel curinta iyo falkinta sheeko fanneedda.

AFEEF

Maahmaah qiimi badan oo Soomaaliyeed ayaa tidhaahda: afeef hore lahaw ama adkaysi dambe. Sidaas darteed waxa aan ka afeefanayaa in dhammaan magacyada sheekada ku jiraa ay mala'awaal yihiin oo ayna cidna si gaara u metalin.

*****

CAWADDARAN

Mid kasta qarracan ayuu dhinac ula jeesaday. Waxa ay iska waayeen hal mid oo isagu guulaystay. Kulligood dambiilayaal wada guuldarraystay ayay noqdeen. Wataa Ramla labada jiqil u gaysay labada law, afsaabkana ku qarisay fool ayna farxadi ka muuqan, indhuhuna kabba dhiigga noqdeen. Ilmada dhabannada soo marta ayaa iyada oo kulul ku qaboobaysa laabta. Haddii aad cabbaar u fiirsatana waxa aad laabteeda ka dareemaysaa dhaqdhaqaaqa xawliga ah ee uu wadnaheedu samaynayo. Cabsi badan oo ka muuqata ayaa garaaca wadnaha saa'idinaysa. Marada caddanka u badan ee laabteeda ku daboolan ayaad dhaqdhaqaaqeeda aad moodaysaa in ay iska bixinayso.

Kibirkii, islaweynidii iyo qabkii ay huwanaan jirtay Randa faro kuma hayso. Caawa qof ka jilicsan ma laha. Waxa aad moodaa in reerkoodii oo dhan mid aanu ka hadhin. Wataa gollonka iskula jirta ee aan halmar madaxa kor u qaadi karin. Sankii ay taagi jirtay sidii ay kolba duufka uga tiraysan ayay xoor kaga kicisay__hiq ayuun baa ka soo hadhay. Waxa ay gaysatay ayaa ugu wacan e, kuddaa.

Dhaaxaa geesinnimo, ad-adkaan iyo karti laga haybsaday. Haddii uu in badan gorodda taagi jiray, liidashana uu necbaa maanta waa ka ugu daciifsan afartooda. Haa! Hanad, bal fiiri! Inta uu galalaatiga u dhacay oo uu jilbaha dhulka dhigtay, deetana labada sacab dhulka ku garaacay, ayuu shaadhki caddaa ee uu ku xarragoonayay, halkaa shafka ah gacmihii uskagga ahaa la dhacay! Maanta waxaad moodaa weligii in uuna madaxa kor u qaadin. Darxumada shaadhka cad uu u geystayna waxa uu yeeshay araggii xamaalka. Dhidid iyo oohin isku darsamay ayaa ka qubanaya. Shaadhkiisa ayuu ku tirayaa labadaba, illayn xarrago uma joogto e.

Maskiin! Awalba wuxuu ahaa nin iska af gaaban, dhibkana neceb, se hadda isagii baa dhib ku jira. Indhihii yaryaraa godkii ayay ku libdheen, dabka iyo kaarka ay maskaxdiisu xamili la' dahay waxa aad ka garan sida uu dhakada u xoqoyo. Kacaa-fadhiisi ayaa naftiiba kaga jaray. Danta ayaa ku kallifaysa in uu socod-dhaqaaqo. Caawa sida uu u miraadayo ma moodid in ay raggannimo ku hadhay. Magacii ba' nin yaqaanay Haykal, maanta garan mahayo. In aan la garan ayaaba fiican ee isna kuddaa.

Kabadhka ayay furtay. Dhammaan dharkeedii ayay isha wada marisay. Cabbaayad madaw ayay xidhatay kaddibna fuwaal caddaana ayay timaha ay dhawaan engajisay ku dabooshay. Sarwaal jiinisa ayay ka hoos xidhatay cabbaayadda. Muraayadda inta ay hor istaagtay ayay lebbiskeeda la dhacday kaddibna kabo caddaana ayay isku juftay. Quruxdeedii dabiiciga ahayd markii ay ku ladhay lebbis qurxoon waa ay sii quruxaysatay. Iyada oo isku mashquulsan ayuu taleefankeedu soo dhacay. Waa ay fiirisay mise waaba Sacda oo ay ballansanaayeen. Inta ay ka qabatay ayay ku tidhi: wax yar isug saaxiib waan soo baxay e. Goobtii ballanta ayay soo istaagtay. Waa Sacda iyo asxaab ayna garanayn oo qosol iyo kaftan isku jiibinaya.

Barxaddii cawayska ayay gabbal dhaca ka soo joogsatay. Sacda ayaa u kacday laabtana galisay, iyada oo ku leh; "Soo dhawoow gacalo." Fadhiga ayay si wada jir ah u qaabileen. Haykal oo inanta ku cusub quruxdeeda la ashqaraarsan ayaa Sacda waydiiyay; "Gabadhu ma Ina Yuusuf baa?" Sacda oo magacan uu Haykal iska soo jaray ka yaabban ayaa ku warcelisay: Yuusuf waa kuma? Isagu wuu garanayay in uusan magacan u jeedo kale ka lahayn, waxa uuse ula jeeday quruxda inantu in ay tahay Ina Nebi Yuusuf [CS]. Qunyar ayuu u yidhi; "Gabadhu ma hayb Nebi baa?" Inta ay qosleen ayay kaftan goosgoos ah ku dhaafeen. Isagu se iyada ayuu ku maqan yahay. Da'deeda iyo lebbiskeedu sida ay iskugu soo baxayaan ayuu ku indhadaraandaray ba.

Caweys qurux badan ayay is ku barteen deetana inta la kala hoyday midba goob u seexad tegay. Haykal ma hurdaa u taal? Sawir ka sii qurux badan muuqaalkii Randa ee caawa ayaa la hor dhigay. Sida oo aad moodid in uu yahay laylis laga sugayo ayuu kolba dhan ka qiimeeyay, deetana xaqiiqsaday in ay caawa wadnihiisa qayb iyadu degtay. Maya e, wada yeelatay. Habeenkii oo dhan waxa wehel u ahaa dhoollacaddayn uu fiidkii si qarsoodi ah indhaha kaga buuxsaday. Xataa gidaarka guriga uu jiifo ayaa yeeshay suuradda Randa. Isaga oo qudha ayaa isku jiibiya qosol haddana sheyddaanka ayuu iska naaraa. Indhaha hadduu isku qabto iyo hadduu kala qaadaba Randa ayaa hortaagan. Furaashka go'a ku dadan waxa uu yeeshay lebbiska Randa.

Subax qulban oo culays iyo calmasho leh ayaa u baryay. Waa hubaal oo waxa uu dareemayaa in uu ka helay inanta, balse waxa uu u qaatay in uu degdegayo. Cabbaar ayuu ka fekeray. Wuxuu iswaydiiyay dookhan durba inanta u boqray. Go'aan ayuu ku gaadhay in uu raadiyo, haddana wuu ka cabsaday. "Armay ku diidaa. Waad degdegaysaa. Inantu kuma doonayso, oo maxay kugu diidaysaa? Miyaadan u qalmin? Haa, waad u qalantaa." Boqollaalkaa su’aalood iyo jawaabood ayuu

hal mar kulansaday. Dhanka kalena, waxa uu istusay in uu Randa ka war doono. Haddana waa uu cabsaday. Ugu dambayn waxa uu ku qancay ta hore.

Taleefanka oo ka durugsanaa ayuu laacay. Koontantiska inta uu galay ayuu Sacda wacay. "Ma nabad qabtaa Sacda?" Ayuu weyddiiyay. Markii uu nabdaadiyay ayuu dantiisi u dhaadhacay.

Haykal: waxa aan doonayay Randa, runtii aad baan uga helay, inanta. In aad na xidhiidhiso ayaan kaa codsanayaa.

Sacda: saaxiib waan kula xidhiidhin. Telefonkeeda ayaan kuu qori, waanan u sheegi in aad soo wici doonto, ee la hadal markaa.

Haykal: waayahay saaxiib aad baad u mahadsan tahay.

Caawa ayay la balansan tahay Hanad. In ay nafteeda bisho oo ay in badan ka shaqayso inta aysan bixin ka hor waa u dabeecad; quruxdana wayba u dhalatay. Dhalaalka luulka iyo iftiinka wejigeeda ka baxayo ayaa sabab u ah naanaysta magaceeda ku ladhan, Randa-Luula. Haddii horaaddada laga eego waxa lagu

tilmaami karaa qalanjo, haddii qoodha laga eegana waa geenyo, waa indho deero, waa masciideed. Marka ay socoto kubka awoodaysan iyo miskaha isku baxay ayuu dhulku la gariiraa. Qurux u dhimanni ma jirto.

Galabnimadii ayuu soo wacay una sheegay in uu doonayo in uu caawa arko. Waxa ay la ballansan tahay Haykal oo isaguna xubbigeeda la tiicaya. Waxa uu ku rejo wayn yahay in ay odhan doonto; "Aniguba ma seexan xalay oo dhan adiga ayaan kaa fekerayay!" Casar dheer buu isasoo diyaariyay si uu jacaylka cusub usoo dhaweeyo. Iyadu dan kama laha inankan ay shalay aragtay, oo waxay caawa ballansan yihiin Hanad. Waxay doonaysay in ay inta galabnimo ku sugto wiilkan ka codsaday in uu la kulmo.

Haykal tukaanka ubaxyada ayuu sii maray wuxuuna horay usii qaatay ubax midab casaan ah u badan qaybna caddaan ka ah, afar birdhimood oo madowna ku xardhan yihiin. Intii uusan goobta tagin ayuu ka fikiray in uu ubaxan ka yeelo mid ubaxyada kale gaar ka ah. Waxa lama huraan ah in uu calaamad u yeelo. "H & R" tani waa summadda ubaxan uu gaarka u

yeelan doono. Halkii uu Randa kula balansanaa ayuu taw ku yidhi, deetana daqiiqado ku sugay. Judhiiba markii uu indhaha saaray ayuu la daraandaray, deetana isku qanciyay in ay isaga uun u han-wayn tahay. Laba kursi oo uu meel gaar ah ku diyaarsaday ayuu ku soo dhaweeyay fadhigana uga kacay. Iyada oo ka yaabban marxabbaynta uu inanku wado ayay la fadhiisatay, wayse fahansan tahay in uu dan muhiim ah ka leeyahay.

Fadhiga ayaa lagu nastay, deetana la is-eegay.

Muddalabkii oo meel aan ka fogayn taagnaa ayaa dalab goor hore loo sii sheegay, loo inshaaray in uu soo taxo. Cunto iyo cabbitaan kala jaad ah ayaa miiski la soo dhoobay, deetana hareeraha laga galay. Hadallo yaryar oo u jeeddada saxda ah lagu furfurayo ayaa lagu aftaxay. Isaga oo neef-tuuraya ayuu kolba dhinac eegay, oo ku dhiirraday in uu sheego wixii xalay hurdada u diiday. " Ixiix. Een. Randa waxa aan kuugu yeedhay in aan arrin kuu sheego. Tan iyo wakhtigii aan ku arkay waxa aan dareemayaa rabitaan xoogan oo dhankaaga ah. Waan ogahay oo markii aan ku arkay shalay unbay ahayd, haddana calmashadu ma aha mid aragtida koobaad ka fog. Waa kii abwaankii lahaa:

Ballan maaha jacaylku

Bandhig layskugu baaqye

Waa ishaa biligteeda

Wax boggaaga ku beerma.

Wax ay tahayba illaa xalay adiga unbaan kaa fekerayay. Dabcan waad dareemi kartaa waxa aan ka wado. Waan kaa helay. Haa, waan kaa helay. Waxa aan doonayaa in aad lammaanahayga nolosha ii noqoto; anna boqorad ayaan kaa dhigan doonaa."

Intaa markii uu si dhiirran oo aan joogsi lahayn dheggaha ugaga afuufay sidii isaga oo soo diyaarsaday, ayuu kursiga hoostiisa laacay oo ka soo saaray ubaxii uu horay u soo qaatay, deetana inta uu fidiyay ku yidhi; "Hoo ubaxa caashaqa!"

Inta ay muusootay ayay cabbaar dhankeeda bidix sii jalleecaysay, sidii oo ay daawanayso duni aan isaga u muuqan. Dabcan wuu arkaa in ay la yaabtay arrinkan kadisada ah. Wadnaha ayaa ruxmaya wuxuuna iswayddiinayaa su'aalo midiba takale ka daran tahay. Koox ayaa gudihiisa ku gorfaynaysa xaalad uusan isagu maamulayn. Su'aal marka uu iswayddiiyo mid

kale ayuu uga sii boodayaa; "Miyay kugu qosli doontaa? Ma kici doontaa? Ma inta ay kor u booddo oo ubaxa kaa dafto ayay laabta ku galin mise inta ay ku caydo ayay ku odhan doontaa, 'hanna baran wax yahow dulliga ahi'?"

Inta ku soo jeesatay oo ilbidhiqsiyo indhaha ku haysay, ayay ku tidhi; "Ubaxa dib u cesho oo wakhti isii aan kuugu soo jawaabo." "Maya, ubaxa qaado jawaabtana waan kaa sugi, nin weyn oo gacan soo taagay dib ha ugu celin!" Waayahay iyo ubaxii oo si aan qushuuc lahayn u guddoontay ayay mahadsanid u raacisay, wayna kaceen oo midba halkii u qorshaysnayd u dhaqaaqay. Haykal isaga oo kala garan la' guul iyo guuldaro wax uu sito, balse kalsooni dareemaya ayuu qolkiisi toos u abbaaray.

*****

Awalba ballan middan uga muhiimsan ayay lahayde markiiba halkii ay Hanad kula kulmaysay ayay u hollatay. Meeshi ay horraanba fadhiisan jireen ayay salka ku sintay, deetana daqiiqado kadib jacaylkeedi oo ordaya isa-soo taagay. "Soo dhawoow xabiibi", ayay tidhi iyada oo aad ugu faraxsan aragtidiisa. "Waan dhawahay Randa ma fiican tahay?" Kursigii uu fadhiistay inta keedi ku cidhiidhisay iyada oo baarka tihimiisa jilicsan, ee sida quruxda badan looga shaqeeyay u salaaxaysa tidhi; "Waan fiicanahay macaane, ayaantan halkeed ka baxday kuma arag'e?"

Gacantii ay madaxiisa ku salaaxaysay inta tiisa dul saaray oo faraheeda iyo kuwiisa is-dhaafiyay, oo hoos usoo celiyay oo dhabankiisa ku qabtay ayuu si dabacsan ugu yidhi; "Qaali mashquul adduun ayaan iska galay, ee iiwaran maxaa inoo kala dambeeyay?" Sharaab iyo cunto fudud ayay halkii ku wadaageen, hadallo goos-goos ahna kala gurteen. Ubaxii oo gollonka ugu jira ayuu indhaha ku dhuftay, oo yidhi; "Ubaxan quruxda badan ma aniga ayaad iisoo qaadday?" Isma-aynan dhibin'e, inta muusootay ayay ugu hal-celisay; "Haa macaane. Miyaadan arkayn in aan ku xardhay labadeenna magac? Dhanka kale u

rog. R&H saw ma aragtid? Iga guddoon!", deetana qushuuc isku sagootiyeen.

*****

Markii ay magaalada ka tagtay sannad ayaa laga joogaa. Tiro ahaan waqti badan se taya ahaan yar. In ay shalay timid ayay u sheegtay. Hanad jacayl aan awooddiisu xad lahayn ayuu u hayaa Ramla. In uu jacaylkaa u qaado xaq ayuu u leeyahay, oo nin arkaa ma dhaafeen. Waa inan deggan oo midab maariin dhalaalaya iyo ilko casaan ku dheehan leh. Sida Sukhradu ay xiddigaha uga dhex soocan tahay ayay filkeed uga sarraysaa. Quruxdeedu waa jaad dumarka gaar ka ah.

Fiidkii ayuu wacay una sheegay in uu soo mari doono marka uu soo hooyanayo, iyadna ka oggolaatay. Markii uu ka soo dhammaaday kulankii Randa-Luula ayuu usoo dhaqaaqay dhinaca Ramla iyo xaafadahooda. Aad ayuu ugu boholyoobay. Muddo sannad ah indho muunan saarin. Markii uu xaafaddii usoo dhawaaday ayuu wacay una sheegay in ay usoo baxdo. Meel aan gurigooda ka fogayn ayay ugu timid. Markii uu indhaha saaray ayuu farxad la ilmeeyay, inta uu ku booday ayuu laabta ku qaatay. Muxibbo, dareen iyo jacayl ayuu ku laabgaliyay, iyaduse waxa ay u muuqatay in aysan wadhaaba ku jirin. "Macaan, noloshaydii, gacalo, ma ii nabad timid? Waad iga soo

daahday. Sannad ayaad iga maqnayd! Aad ayaan kuugu xiisay." Erayo noocan u badan ayuu ku qulуuluxiyay, oo dhanna ka dhunkaday. Inta uu neef uu jiitay bannaanka usoo tuuray ayuu mar kale yidhi: waan ku jeclahay. Waanan kuu xiisay gacalo.

Markay indoora wada taagnaayeen, sheekooyin xiiso badanna ka wada hadleen, ayay dhaxantii dareemeen. Inta ubaxii casaa usoo fidiyay ayuu ku yidhi; "Macaan hoo hadiyaddan adiga ayaan kuugu talogalay'e. Ubax ka duwan kuwa kale weeye macaan. Calaamadda jacaylka magac ee ku xardhan ayaa caddaynaysa xaddiga xidhiidhkeenna." Iyaduna si dhibranaan ka muuqato uga guddoontay kuna tidhi; "Mahadsanid gacale Hanadoow." Sidaas ayaana lagu kala dhaqaaqay.

*****

Waa xilli fiidkii ah. Magaaladu aad ayay u cammiran tahay. Dhaxan aan badnayd ayaa soo gufaacaysa, jidhka nugulna uu dareemayo. Intii nasiibka lahayd lammaane ayay dhinaca isku hayaan, qof aan cawadhalad ahayn ayaa kali jawigan ku ah. Iyadu jawigan caawa si gaar ah ayuu qurux ugu leeyahay. Laba arrimoodba aad ayay ugu faraxsan tahay. Magaaladda oo ay sanad ka maqnayd oo ay kusoo hagaagtay xili jawigeedu aad u macaan yahay iyo in ay caawa la kulmayso jacaylkeedi oo ay aad ugu xiisay sanadna aysan indho saarin. Habeenkii ay timid isla habeenkii ku xigay ayay la ballantay kii ay dadka ugu jecelayd. Haykal ayay caawa la soo cawayn doontaa. Ma jiro wax ay ka jeceshahay aragiisa iyo in ay wakhti dheer la qaadato.

Muddo dhawr saac ah ayay isdiyaarin ku jirtay, si walba oo ay bilicdeeda u siyaadin karto ayay isku dayday. Markii ay diyaar garoowday ayay u amba-baxday halkii ay kula ballantay Haykal. Si xiiso ku dheehan yahay ayuu ugu diyaar garoobay, balse aan ka ahayn kalgacalka iyo jacaylka ay iyadu u hayso mid lamid ah. Haa, isagu dan kama uu laho jacaylkeeda, balse aad ayuu ugu xiisay.

Goobtii kulanka ayay uga sii horreeysay, deetana markii uu kadinka ka soo galay inta ka horboodday ayay isku martay, oo ku dul qallaftay. Kun eray oo wada caashaq ah ayay ku daldashay. Inta gacmaha la isqabsaday ayaa kuraas meel gaar ah ku diyaarsan la fadhiistay. Sida ay maanta u nuurayso Ramla ma malayn kartid. Waa boqorad Ilaahay suuro cajiib ah u sameeyay. Haykal ayay iyadu ugu dhan tahay. Lagama dhaadhicin karo nin lamid ah ama ka wanaagsan ayaa dunida ku nool.

Fadhi qurux badan oo an iska soo horjeed ahayn baa la wadaaggay. Lammaanuhu kuma qurux badna in ay laba dhinac iska soo eeggaan. Waxa ay ku fiican tahay in ay dheegga isa-saaraan, deetana ilqoorka isku xaddaan. Inta aad isugu dhawaadeen oo gacmaha is-hoos mariyeen, ayay naxariis iskugu dhageen. Laabta ayay kaga seexatay, iyada oo la xanshaahaqaysa. Caawa ayay u dhan tahay, oo wax ka dhiman ma jiraan marba haddii ay Haykal kashiisa ku jiifto.

Xiise dararay iyo hillow ay u qabto awgii caawa waxa ugu daran in ay halkan ka ba kacdo. Haa, waxa ay ka yaabban tahay saacaddan xawaaraha ku socoto!

"Dheerayn ogaa sawtii iminka uun fiidka ahayd!" Ayay hoosta iska leedahay. Muddo sannad ah oo ay u daarnayd heestii ahayd:

“Wakhtigu wuu dheeryahoo

Dhulkuna wuu kala fogyee!"

Caawa ayay ku beddaleen heestii odhanaysay:

"Guyaal baan kala maqnayn oo

Wakhtigu wuu gaabinaayaye

Goormaad timi waan ku rabaye?"

Saacado ka yar daqiiqado markii ay halkaa ku caweysimeen ayay dheelmasho u qalab qaateen. Boorso yar oo kob halkeer ah u taallay inta laacday oo ay haddiyad Kaadoo ku xidhan iyo ubaxii xalay la siiyay ka soosaartay ayay guddoon siisay; "Gacalle hoo alaabtan, oo xasuus ahaan u hayso." In ay ubaxan horray usoo qaadato labo arrin ayaa sabab u ahaa. Waa ta koowaad e, xalay markii ubaxa la siiyay ee ay

guriga ku noqotay waxay ku ridday boorsadan ay iminka sidato, oo kama aynan saarin. Ta labaadna waa in ubuxu uu aad u qurux badnaa. Iib kiisi hore ayaa si wayn loo xushay. Labadaa arrin ba way sababbeen in markele qofkii isagu gacantiisa kusoo gaday la guddoonsiiyo!

Haykal markii ubaxa loo dhiibay judhiiba waa uu gartay in uusan ku cusbayn. Yaab! Kolba dhinac ayuu ka eegay. Mar ubaxa ayuu eegay marna inantii. Ramla markay aragtay ninkan anfarriirsan ayay u qaadatay, in ka helidda uu hadyaddan jeclaaday ay sabab u tahay indha taag-taaggan. Balo kaa heshay. Ma wax laga hellay u keentay? Maxay kala soo doontay? Miyaysan ogayn in wuxuba hantidiisi ay tahay? Kun su'aalood baa sida maahiigaanka ugu hooray. "Miyay kuu tashadeen? Ma is ogaayeen? Malaha isagii ma aha? Halkay ka keentay? Ma in aad Randa jeceshahay bay ogaatay? Talow ma saaxiib ayay la tahay? Maxaa dhacaya?"

Habeenkaa markii hadal iyo haasaawe wixii laga gaadhay la sii jumlaystay ayaa la ismac-salaameeyay. Ramlo iyada oo habeenkan macaansanaysa ayay

gurigoodi u hurdo tagtay, laakiin ninkii Haykal ahaa fajaciso ayaa loo keenay. Randadii uu jawaabta ka sugayay inta raagsaday ayuu wacay, deetana hadal catow iyo canaan wax uu yahay aan loo kala saari karin ku boobay. Mar in uu ooyayo ayaa loo malayn karay, marna in uu faan iyo amar bixinayo ayay u ekayd. "Randa maxa kugu dhacay soo jawaab kaama sugaynin? Maxaad iila soo hadli wayday? Igama aadan helin miyaa? Halkeen la ahay isheeg halkeen ka dhantaalnahay? Miyaanan ahayn ninkaa filkii ka mudan ee ka mansab iyo meeqaam sarreeyo? Wax iisheeg? In aan ku jeclaado miyaanan u qalmin?" Balo! Waar ninku gardaranaa ma qof baa qasab ku jeclaada qof kale? Isba dad jecel oo uusan jeclayn sooma jiraan? Muxuu inanta "i jeclow" ugu canaanan hayaa? Balo ku qaaday. "Horta meeyay ubaxii aan ku siiyay?" Ayuu hadal ugu dhammeeyay.

*****

Waagu inta uu baryayo ayay sugi la'ayd. Subax hore ayay kacday wixii ay hawl guriga ka qaban kartay inta boobsiisay, ayay qolkeedii ku noqotay, deetana telefoonkeeda degdeg u boobtay oo lambarkii ugu korreeyay ee ay xalay oo dhan wacaysay garaacid kula haadday. Waaba lama heli karo, oo waa sidii uu xalay ahaa. "Telefoonkan balaayo maxaa helay? Talow maxaa inankii ku dhacay? Ma dhintay? Ma noolyahay? Malaha waddankaba wuu ka baxay?" Kun su' aalood oo wada dhamac igo kulayl ah ayaa ku hoobtay, oo ay kolba si isku wayddiisay. Kob Allaale oo ay u qaado way garan la'dahay.

Haykal oo isku buuqsan, markii uu balo iyo war xun kula soo dhex-dhacay, shakigii galay ayay wicid kula boodday Hanad oo ahaa midkii ay ubaxa u hadyaysay. Iyada oo aan u jawaabin ayay ka wardoon istidhi, deetana waatan akhbaartiisaba la'. Waxa dhegaheeda kasii guuxaya erayadii Haykal.

Mar ayay isleedahay: ma weerar tashi ku dhisan baa lagugu soo qaaday?! Waxayba ka walaacday in jacaylkeedii iyo kan ay ubaxa ka qaadatay usoo

heshiiyeen. Ma wax laga shakin waayaa! Bal suuree wax aad fashay oo lagu hor keenay. Adduunkuba waa wareegto ayay kaga dhigeen.

*****

Boholyowga iyo xiisaha uu u qabay jacaylkiisa sannadka ka maqnayd, waxa ka go'nayd in uu wakhti badan la qaato. Qorshihiisa ugu weyn waa ka war haynta Ramla cid kale oo uu dan ka leeyahay ma jirto; waa sababta uu telefoonkiisi isooga beddelay. Haa, si uu uga dhaco wicidda ay Randa wacanayso ayuu isooga xidhay lambarkiisi, halka uu telefan kale u qaatay si uu ula xidhiidho Ramla.

Rabitaanka aadmigu waa cajiib! Hanad wuxuu dhibsaday wicidda Randa, iyaduna waxay dhibsatay Haykal, isaguna waxa uu karhay Ramla, halka ay iyaduna khaati ka taagan tahay Hanad. Arrinkan iyo umuurtan marka aad daymooto waxa markaba niyaddaada ku soo dhacaya, tuducyadii ahaa:

"Naftaydu naf bay rabtaa

Naftuna naf kalay rabtaa!"

Daacadnimadu kama soo hadho in aadan qofna xumaynin. Haddii aad qof wanaajiso adiga oo xumaynaya qof kale, waxa aad tahay khiyaanoole. Sida qofka aad jeceshahay uu muhiim kuugu yahay

ayaad muhiim ugu tahay kan adiga ku jecel. Marka haddii aad qof rabitaan u hayso, waxa fiican in aadan lugoynin shaqsi kale oo adiga daacad kuu ah. Dacadnimada shaqsiga kale ha ka faa'idaysan.

*****

Shanta farood isaga oo dhabanka u geeyay, oo maqane joogo ah, kana walwalaya ubaxan baas kobta uu uga imaaday Randa, oo hadh galabeedka gurigan qaddiimiga ah fadhiya isla markaana shaax uu daqiiqo kahor dalbaday oo ka qaboobay intii uu maararow sanaa uu hor yaalo ayuu ku baraarugay dhicidda telefonka miiska dul-saaran. Inta ku boodday ayuu qabtay. Hubaal waxa ay soo wacday wakhti uu garab uga baahnaa, wuxuuba u qaatay in ay xaalkiisa ka war haysay. Haa, maanta qofka kaliya ee laabta iyo niyadda u qaboojin karaa waa Sacda. Marka ay culaysyada iyo dhibku kusoo wajahaan qof ka ugu mudan ee ku garab siin karaa waa saaxiibka, qof lala saaxiibbana waxa ugu gobsan dumar.

Waxa ay doonaysay in ay ogaato xogta labadii qof ee ay iyadu ka dambeysay is-barashadooda. La is-waraysay oo la is xaal ogaa, iyada oo loo wada hadlay sida ay laba saaxiib ah wax isku waydiiyaan. Ninba boogtii ku taala isagay bal-bashaaye, Haykal waxa uu Sacda kala hadlay oogana waramay arrinkii Randa iyo halka uu ka marayo. Wuxuu si cad ugu qeexay in uu arkay ubax, kaas oo isaga kalsooni darro ku abuuray. Haykal oo ka waramayay arrin kaa waxa uu yidhi;

"Sacdaay saaxiib, inantii waanu isbaranay kob fiicanna waan isku aragnay; rajo qurux badanna waan ka lahaa. Maalinki aan isbarannay isla habeenkiisiba caways ayaan tagnay, xidhiidh in ay ila samayso ayaan ka codsaday. Waxay iga dalbatay in aan siiyo wakhti ay kaga soo fekerto. Isla goortaa waxa aan hadyad ahaan u siiyay ubax aan anigu gacantayda ugu soo xulay. Waxa la yaab igu noqotay in isla ubaxii aniga hadyad ahaan la iigu keenay. Haa, waxa hadyad iiga soo dhigtay gabadh kale! Ramla oo ah inan aniga i jecel ayaa ii keentay ubaxii aan Randa-Luula u geeyay."

Sacda oo ka yaabban waxa uu Haykal sheegayo ayaa ka codsatay in uu u sheego qofka ay tahay Ramla iyo in ay aqoon u leedahay. "Haa, waad garanaysaa. Sacda waa inantii aynnu galaasta labaad ee dugsiga sare [fasalka 10aad] soo wada dhigannay. Anigu ma jecli, se iyada ayaa i jecel.
Xidhiidh ayaan la wadaa iyada." Durba waa ay garatay qofka uu u sheegayo. Waxayna tidhi: haddiiba aad qof kale xidhiidh la leedahay, maxaad Randa ka rabtaa? Saw khiyaano ma aha? Dabcan adigu ma jeclid se iyada ayaa ku jecel, mana mudna in la khiyaamo. Wax ay tahayba, anigu waxaan ka war doonayaa Randa, bal

sababta ay kuugu jawaabi wayday iyo halka ay ubaxa ka keentay; ee nabadgelyo saaxiib. Sidaa ayay telefoonka ku jartay. Isaguna halkiisi isaga sii fadhiyay.

Sacda ayay waxba isku qaban waayeen. Layaab ayay ku noqotay arrintani. Haykal ayay eedda saartaa mar. Haddana isla Randa ayay ku leexata. Ramla ayay latacajabtaa sida ay sheekadan kusoo gashay. Nolol wareegto ah ayay gasha, isla daqiiqaddana way ka baxdaa. Afkeedu dhawr jeer ayuu si is moogaan ah u yidhi; "Ubax" Illaa hadda ma garanayo sababta. In ay wax jiraan ayay aqoonsatay. Waxa jira in ay ka wardoonto ayay go'aansatay. Halka laga doonayo ayay wakhti raadisay. Randa in aan looga dhawayn ayay garowsatay. Damaceedi kowaad in ay lahadasho ayay door bidday laakiin in ay la kulanto ayay dooratay. Daqiiqad kadibna inta ay wacday ayay ballan ku samaysteen goob ay isla yaqaaneen. Goor dhaw casarka in ay kulmaan ayay ku heshiiyeen labadooduba. Waa laba qof oo kala dareen duwan. Mid waa sir raadis takalena waa ta sirta waddo in si fudud lagu ogaado ma rabto. "Laba kala bariday kala war la'" ayaa hore loo yidhi.

Goortu casar gaaban ayay usoo dhuranaysaa, goobtuna garasho uguma dhinna. Labada kursi ee ku mataanoobay miiskan dhexdooda yaal ayay labadooduna culays aan badnayn ku hayaan Sacda aya dhanka bari kasoo jeedda. Randa ayaa cagsigeeda fadhida. Sheeko kaftan iyo madadaalo ah kadib Sacda ayaa ka waraysatay arrinkii Haykal. In ay jacayl ka aqbashay oo ay xidhiidh wadaag noqdeen ayay ugu bushaaraysay. Tixgalin ay u hayso darteed in ay kula socoto ayay u tibaaxday. Wax dareen ah oo hadda gacanteeda ugu jiraa in aanu jirin ayay tilmaantay. Wiil Hanad la yidhaa in ay nolol la rabto ayay si hoose ugu sheegtay. Qalbigu in uu midyahay ku noq noqotay. Midkiina Hanad ayaa qaatay. Halkaa in aanay Haylkal waxba u ool ayay Sacda dareentay. Shaki wayn ayay qaadday. May shakigeegii ayaa u rumoobay. Helidda sirteedii wali kamay sal gaadhin. Laakiin Randa waxba ugama soo socdaan.

Kursigii ay Randi kaga kacday ayay kaligeed fadhidaa. Waxbadan oo ay is waydiinaysay hadda kama fikirayso. Waxa ay ka fikirtaba ma yaalaan. Haddii laga tagi waayo inankii mudalabka ahaa ee cabbitaanka u keenay ayay qalbiga ku haysaa. Way la dhacday.

Ragga dookheeda ah ayuu kaw ka yahay. Midabka madowga xiga. Dhererka aan saa'idka ahayn timaha tukhta ah iyo qaab labis kiisaba waa kuwii ay rabtay. Shaydaanka ayay iska naartay. Wax ay u naartay ayay garan wayday. In marwalba la naaro ayay xasuusatay. Sababta loo naaro ayay ku fogaatay. In la fogeeyay oo uu adduunkana ku naaran yahay, aakhirana ehelu naarka yahay ayay garatay. Waxa uu dhibka u marayo ayay fahmi wayday. In aanay fahmin ayaa u roon, haddii ay fahantana waxba kama badali karto.

Waddada saddexda jeer laabata inta aanay albaabka bixin ayay laamiga u dambeeya kasoo dhammaadeen laba qof oo gacanta is haysta. Isha ayay la raacday. May way ka hor gaysay. Gabadha ayay garatay. Niyadda ayay ka xamatay. Wali ismay badalin ayay hoos u tidhi. Inkasta oo ay sannado kala maqnaayeen haddana wali sidii ayuunbay u quruxbadantahay. Waa qurux raggu muhdo dumarkuna ka masayraan. Waa sababta ay Ramla illaa hadda saaxiib rasmi ah dhadigga uga la'dahay. Talaabadi ugu dambaysay markii ay agteeda soo dhigtay ayay iyaduna fadhiga ka kacday. "Alla waa Ramla! " ayay kor u tidhi. Laab uu

gali lahaa nin nasiibka la dhashay, laakiin aan iyada micno u lahayn ayay aayar shab tidhi. Cabbaar ayay horaadda isku hayeen, kadib na labada dhaban iska dhunkadeen. Wiilka oo sugaya ayay salaan aan waxba loogu darin la tiigsatay. Isna inta uu guddoomay ayuu socodkii sii watay.

"Saaxiib waynnu isla soo hadliye lambaarkaaga ii sheeg waa la isugayaaye"

"Naa lambarku ha ii dambeeye wiilka shidan muxuu ahaa?"

"Naa waa mid i jecel oo Hanad la yidhaaye, inna mari ku baree"

"Bisinka naa ninka waan ka baqayaaye markale ayaan

barane, ila soo hadal" "Haye xabiibti nabad ahow".

*****

Sariir daashay ayay dusheeda ku daadsantahay. Labada indhood waxa ay eegayaan guluubka midabka casuusta ah ee dusheeda sudhan, maskaxduse way dhaaftay. Isdiidooyinka dunidan ayay dhex mushaaxayaan. Fikir kasoo bilowday sababta Sacda loogu bixiyay aya hadda maraya. Haylkan iyo ubaxii. Daqiiqadkadibna u sii gudbay Randa iyo Hanad. Kuna habsaamay Ramla. Waxa ay arkayso ayay aamini wayday. Ubaxii Randa loo geeyay ayaa kusoo laabtay ciddii soo iibisay. Waddada uu maray ayay la'adahay. Wadiiqo aanse waynayn ayay haysaa. Waxa ay iskusoo xidhaa Haylkan iyo Randa, haddana waxa ay ku luntaa Ramla marka ay gaadho. Mar dambe ayay Hanad keentay. Ninka udub dhexaadka u ah wareegtadan ayay u aqoonsatay. In isaga ubaxa loo geeyay ayay xaqiiqsatay. In uu isla isagu Ramla siiyay ayay fahantay. Halka in uu kasoo galay Haylkal ayay dareentay. Cajiib! Maxaa sidan oo dhan iskugu xidhay xaaladda. Sidani ma jacaylbaa mise waa jacaylo. Ma khad la isla ogyahaybaa mise waa khiyaano. Mid ay ku tilmaanto ayay garan wayday. Sababta ay waxan oo dhan u dhacayaan ayay is waydiisay. Wax iyada ka galay ayay fahmi wayday. Wax uun in ay ka galeen ayay ogaatay. Mobile-keeda oo aan ka fogayn inta ay

tiigsatay ayay dhidatay heestii uu qadi jiray Cabdi-Hani Xaashi Cabdilaahi. Markii uu marayay:-

"ku dhaartaye dhaayahaygay" dhagahan

maqalkeegiyeey dhabbaan ku jecelehee"

Ayay damisay mobile kii. In uu jacayl jiro ayay qawadday. Dhaarta ayay diiday. Laba qof oo dhab isku jecel in aanay jirin ayay garawsatay. Waxa ay indhaheeda ku arkayso ayaa macallin u ah. Afar qof oo aan is jecelayn, isna jecel ayaa u muuqda. Wax walba oo ay ogayd iyaga ayaa beeniyay. Afartan arwaaxood ee ubaxu shanta ku tahay ayaa layaab ku riday. In ay halkaa ku dhaafto ayay dooratay. Haddana In ay ka sal gaadho ayay ka doorbidday. Shantoodaba in ay miis iskugu keento ayay go'aansatay afarta qof iyo ubaxaba.

*****

Maanta waa jimce. Waa maalintii sabtida ka horaysay. Si kale haddaan u dhigo waa maalinka khaamista iyo sabti u dhaxaysa. Sacda aad ayay maalinkan ugu caajistaa laba sabab dartoodba. Gallinka hore in ay caruurta u maydho ayay karahsataa. Galinka dambena in ay hooyadeed xaafadda kasii reebto ayaa culays ku ah. Jimce walba iyadaa joogta. Waa u astaan middaasi. Sidaa darteed khamiista ayay ka jeceshahay. Cadceeduna si gooniya ayay uga kulashay lixda maalmood ee kale. Waa astaan illaa yaraanimadeedii ay ku taqaanay maalinkan. "Dambigii xalay dhacay ayaa laga jarayaa dhulka" way maqli jirtay, laakiin ismay waydiin jirin waxa habeenka dambiga loo galo iyo sida loo galo toona. Markii ay waynaatay ayay ogaatay. Maantase intii jimce ee ay jirtay way ka duwantahay. Hooyadeed ayay ku qancisay ay galabta joogto. "Saaxiibadday oo dalka timid ayaan soo dhawaynanaynaa hooyo" ayay ku jawaabtay markii la waydiinayay xagga ay tagayso. Ramla xalay ayay wada hadleen. In ay kulmaan oo ay Hanadna is barto ayaa lagu heshiiyay, Randana in gabadh ay saaxiibo yihiin barayso ayay u sheegtay, Haykalna in ay arrintii kala hadkayso ayay ugu bushaaraysay. Haye iyo hawraarsan markii uu yidhi

ayay u raacisay ubaxiina soo qaad. Goob qudha ayay kulanka u astaysay. Goortana isku mar ayay u qabatay laakiin iyaduba way ogtahay in aanay mar wada iman karin.

Lebbis ay xulashadiisa ku daahday ayay xidhatay. Quruxdii ay lahayd ayay mid kale ku dartay. Kadibna ku hagaagtay gurigii Randa. Ogaysiis ay sii bixisay ayaa ka caawiyay in ay u tagto Randa oo aanay waxba ka dhul ool. Inta ay dhaashi iyo qurxin awoodeeda ahayd ayaa ay ku taagsatay.

"Naa iga eeg labbiska, illayn gabadh baan baranayaaye miyaanan shidnayn?"qosol muusood ah ayay Randi raacisay.

"Naa bal aamus aniga yaabaybee haddaan nin ahay kaama hadheen ba maanta'e'"

"Naa inna mari dambi baad tehee ha i dambaajine".

Waxa lagu hagaagay hotelkii lagu ballamay, iyaga oo aan isku ujeeddo ahayn. Sacda waa qof waxwalba og wax sugaysa, halka ay Randa tahay qof barasho

gabadh u socota. Waa la kala war laayahay. Intii aanay gaadhin ayuu Haykal soo wacay Sacda. In uu goobta joogo ayuu ku wargaliyay. In ay kusoo dhawdahay ayay ugu warcelisay.

Labada geed ee is xiga markii ay dhexdooda kasoo baxeenba Haykal baa arkay. Randa! Ayuu hoos u yidhi. Fadhiga ayuu ka kacay, haddana wuu ku noqday. Sababta meesha ay u timid ayuu is waydiiyay. Arrinka laga hadlayay in ay iyada tahay ayuu xasuustay. In aan maanta loo baahnayn ayuu garowsaday. Sacda ayuu ka shakiyay. Haddana wuu ku kalsoonaaday. Isaga oo kumanaan dareen iyo su'aalood gudahiisa ku jiraan ayay soo gaadheen. "Soo dhawaada" ayuu ku af gobaadsaday. Hortiisa ayay soo fadhiisteen. Labadiisa indhood ayuu hoos u fooriyay. Sacda ayuu haddana eegay. Randa oo aanay ka qasnayn ayaa kaftan ku bilowday. Isna wuu la jalbeebtay. In uu meesha iska fadhiyay ayuu u sheegay Randa. Waa been uuna garanayn sabab uu u sheegay. lambarka Sacda ayaa yeedhay. In ay dhammaan dhismayashaa soo dhafaan ayay u sheegtay. Haykal oo yaaban ayaa wajahaddiisa eegay. In yar ka dibna waji uu garanayo oo mid aanu garanayn la socda ayaa kasoo baxay

Randa gadaasheeda. Waa Ramla oo uu nin weheliyo. Gacanta ayuu haystaa, iyana way ogoshahay. "Ramla" inta uu yidhi ayuu afka gacanta saaray. Jaleecadii kowaad ee ay Randa dib u eegtayba waa Hanad. Indhaha ayay isku qabatay. Si ay been u noqoto. Laakiin waa laftiisii. Wadnaha ayaa garaacii laba jibaaray. Way soo dul istaageen iyaga oo xaalad kale ku jira. Hanad markii uu Randa arkay ayuu dhidid kasoo booday. Ramlana haykal markii ay indhaheedu ku dhaceen ayuu naqasku isku taagi gaadhay.

Miis uu hadheeyay yaab ayay hareeha ka kulaaleen. Dunidii yaabka oo Sacda atoore ka tahay ayaa la galay. Qof la hadlaya qofkale ma jiro. Aamusnaanta ayaa is gaadhay. Qof walba isaga ayaa isla hadlayaa. Hadal uu kaligii maqlaayo. In uu halkan yimaado inta uu ka qoomameeyo ayuu Naftiisa iyo ciddii u yeedhayba habaaraa. In aan maanta loo kala kacayn ayuu qof walba yaqiinsadaa. Dambigiisa ayuu dusha saartaa. Qofwalba laba qof oo kale ayuu xidhiidhkiisa akhristaa. Inta kale waxa ay soo dooneen ayuu is waydiiyaa. Dabin in uu ku jiro ayuu garowsadaa. Nasiib xumo iyo nasiib wanaag mid uu yahay ayuu kala garan

waayaa kulankani. Dhammaantood saaxadda caadiga ah way ka baxeen. Sacda ayaase wali joogta. Iyada ayaa maanta hadal awoodda.

"Dhammaantiin waad yaabteen! Haa waliba aad waan hubaa, sidaa aad u yaabteen ayaan anna u yaabanahay, saw idinku sidan maydun dooran?" cid uga jawaabta ayaa la waayay su'aasha. Sideed indhood oo aan is dhaamin ayay ku eegeen wajigeeda.

"Ii dhiib ubaxii" ayay amar ku bixisay. Gacan aan tiii soo qaaday ahayn ayuu Haykal kusoo fidiyay. Inta ay ka qaaday ayay badhtan kooda dhigtay.

"Dhammantiin waad wada garanaysaan ubaxan. si khiyaano iyo meerto ah ayuu idinkusoo wada maray, saw runtay ma aha? qofba qof ayuu guddoonsiiyay, illaa uu kusoo laabtay halkiisii. Miyaydaan is wada khiyaamin? Haykal iyo Randa, Randa iyo Hanad, Hanad iyo Ramla, Ramla iyo Haykal; tani waa shaxda aad qalbiyadiinan midiba u ooman yahay mid kale ku dagdeen. "

*****

Xilligu waa fiid ay markaas uun cadceeddu godka shalam tidhi. Waa ay xarrago xarootay maanta. Casuuskii dharaarta iyo maalinka kala kaxaynayay ayaa weli taagan. Haddii ay tahay wakhtigii la faallayn jiray dhawaqa shimbiraha, hogotus-ka uu habeenkan yeelan lahaa ayaa ah "Fiin baa ciyay ama Galow ba yeedhay!" Dadka xilli yaqaanka ahi CAWADDARAN ayay goortan yidhaahdaan. Dhisme uu tunmaal farsamo xuni yabyabay sidii, ayuu soo dumay oo jilbaha dhulka la tiigsaday Hanad. Dareenku waa cajiib! Ka warran hadday hareertaada fadhiyaan laba qof oo midna aad adigu naftaada ka jeceshahay, midna isagu qudhiisa kaa jecel yahay. Sow noqon ma haysatid qofkii ugu nasiibka badnaa? Se caawa iyaga ayaa ugu nasiibxun. Wuu jeclaa la kulanka Randa oo Haykal qofka ugu mudan ee niyaddiisa ku jiraa waa iyada, se caawa haddii uu awoodo ma aysan soo hor yuururteen. Sow Ramla ma ahayn qofkii ugu jeclaa la jooga Haykal? Haa ii dheh! Hiifidda ay araggiisa nacayso ayaa sifaynaya xaalkan. Haa, waa xaal-maroorsan. Odhaah duuga baa lahayd: afeef hore lahaw ama adkaysi dambe. Hawshan bilowgeedu maroor buu ahaa waana tan keenaysa in ay murugto dhammaadkeedu.

Qof in uu lahaado doonis shaqsi kale waa subnaha nolosha. Abuurta Eebbe ee lammaanaynta ah ayaa sahlaysa, oo qofku waxa uu leeyahay rabitaan jinsi. Dookhu waa kan kuu diida qof ku doonaya, ee kuu dira mid isagu ku diidan. Bulaanka iyo sawaxanka ka baxaya dadka goobtan ku caweysimaya, qosolka iyo doodda halkan ka aloosan, shantan qof iyagu kamid ma aha. Sidii oo dhegaha qam laga siiyay, afkana nab la siiyay ayay indhaha ka mirigmirgsiinayaan. Mid kasta dullinnimo iyo in uu khiyaamo sameeyay, isna la khiyaamay ayuu xaqiiqsaday. Dabcan, midba ku kale ayuu khiyaamay. Tani waa tusaalaha koonkan iyo dhimmanaanta aadanaha.

Ramla, markii ay aragtay in ilmadan ka qubanaysa aysan joogsi jahayn, ayay go'aan ku gaadhay in ay foolkeeda ku qariyo afsaab halkaana ay qalbigeedan gubanaya oohinta kula jiibiso. Bal eeg Randa, halmar madaxeeda kor uma qaadi karto oo waa uu ka culus yahay intii hore! Ma dhabankii quruxdiisa aad ogaydeen, ayaa dadka la tusi kari laayahay. Illin dareeraysa dhabannada iyo duuf hoosaya ayaa suurad xumeeyay. Maya sidan ayaa u roon. In ay maskaxdu qaraxdo waxba ugama dhinna. Indhihiisu

waxay ku maqan yihiin eegmada ubaxan hortiisa yaal ee uu galab uu faraxsanaa soo qaatay, laba xaraf oo dhamac ku noqdayna uu si farxad iyo farsama leh ugu xardhay. Wuxuuba caawa isleeyahay: hooge, maxaad calaamaddan baas ugu yeeshay?! Hanad isuga warkiisu waa jilbaha uun dhulka ku hay!

Sacda waxay awood u yeelan wayday la joogga dadkan. Damiirka fayow ayaa u diiddan in ay la sii jaal ahaato kuwan is-dulleeyay. Waxay go'aansatay in ay isaga dhex baxdo, balse intaa ka hor ayay hadalkeedii ugu dambeeyay ku soo afmeertay:

"Markii aan anigu isbaray Randa iyo Haykal, waxa aan moodayay in aan arki doono iyaga oo ah lammaane daacad ah oo isku faraxsan. Runtii markii uu Haykal ii sheegay in aysan farxad oolin, bal e hadyaddii uu Randa siiyay ay isaga dib ugu soo noqotay, waxaa igalay shaki weyn. Waxa lama-filaan igu noqotay, markii ay Randa ii sheegtay in ay ubaxii siisay iyada kay jeclayd, waa Hanad'e. Ma qiyaasi karayn halka ay Ramla ka keentay ubaxan ay Haykal u siisay, se markii aan isku eegay qofka ay Randa siisay iyo qofka ay Ramla la socotay waxaan xaqiiqsaday in ay jirto khiyaamo weyn iyo dhagar uu midiba ka kale

gaadhsiiyay. Haa, Haykal wuxuu ubaxan siiyay Randa, iyaduna waxay siisay Hanad, isaguna wuxuu siiyay Ramla. Waxa cajiib ah, in ay Ramla hadyad uga dhigtay Haykal. Bal eeg meertadan! Sow la yaab ma aha? Anigu waan ku guulaystay in aan fashiliyo arrinkan. Meeshan ayaan isugu kiin keenay, qof kastana isaga ayaa go'aanka noloshiisa iska leh. Nabadeey, waan idinka tagaye."

Haddii uu qofku khiyaamo hal qof, dabcan raalligelintu waa macquul. Ka warran haddii ay dhagartu tahay mid isku xidhan oo uusan hal qof go'aan ka gaadhi karin. Ramla ayaa kor u boodday inta ay ubaxii miiska ka tuurtay ayay kadinka ka dagtay. Dareennada noocan oo kale ah qofku naftiisu waxa ay samaynayso ma uu garan karo. Qofkii dheehda sida ay u roortay markaba in la jiidhay ayaa ku soo dhacaysa. Qof dareemaya dhagar in uu sameeyay weeyo. Indhaha aad wax ugama aragto, se maqalka dheguhu waa ay furan yihiin. Waa sababta ay laamayda dhexdeeda kolba dhan u cararayso. Daal inta ay dareentay ayay badhtanka laamiga istaagtay. Hanad ayaa ka daba baxay si uu arrinkeeda u dejiyo, balse wuxuu indhaha ku dhuftay iyada oo badhtanka laamida taagan iyo

gaadhiga xamuulka ah ee xawliga ku socdaa ee waxa yar usoo jira. Inta karaankiisa ah ayuu soo dheereeyay. Marka uu la siman yahay inta uu gacanteeda qabtay ayay laabtiisa ku dhacday oo ay ku dhagtay.

*****

Dhabanka ayay gacanta ku masaxday. Qoyaan ur leh ayaa gacanta ka soo raacay. Waxa ay fiirisay waxa gacanteeda ku yaal. In ay xinjiro faraha kula jirto ayay aragtay. Ilmadii ka socotay iyo xinjirahan isku darsamay ayaa godanka bishimaha ugu dhacay, deetana carrabka u dhandhamo gaadhay. Markale ayay tirtay oo haddana eegtay. Kani waa dhiig. Haa waa dhiiggii Hanad. Maya, waa midkii Ramla! Sidee lagu kala saari karaa xinjiraha ka soo booday taayirka labada qof laamida ku xaquuqay? Randa waxay u jeeday markii ay kasoo daba baxday labadii ka horreeyay, iyaga oo badhtanka waddada lagu masaxay. Waa qofkii ay dunida ugu jeclayd waxa horteeda yaalla. Hilibkoodii iyo dhulku waa ay isku dhageeen. Dhulku waa wada dhiig. Masiibo weyn ayay sida filinka u daawanaysaa. Ha daawatee ku daa!

Qofka Randa gadaasheeda taagan, ee isaguna wax walba eegayaa waa
Haykal. Far dhaqaaqda ayuu iska waayay. Waxa uu u jeedaa dhiigga ay Randa ku qubaysatay iyo maydadka hor yaalla. Wixii gudaha ka dhacay ayuu waalli qarka ugu saarnaa tanna bal suuree. "Maya! Maya! Maya! Ma dhici karto." Hadal kale wuu iska waayay

CAWADDARAN

CAWADDARAN in ay tahay ayuu xaqiiqsaday. Xaqiiqsashadaa ayaa miyir ugu dambaysay. Wuu isku dhex yaacay! May wuu wareeray! Alla maya, wuu waashay. Khalaas! Haa, wuu waashay Haykal. Bas, bas, wuu ku daayay. Wuu waashay! Washay!

Xataa awood ay ku qaaddo maydadkan hor dhooban way iska wayday. Toos ayay ubaxday. Toban gidaar ayay ku sii dhacday. Boqol jeer ayay ku sigatay in ay god meel ka qodan ku dhacdo. Hadda ayay albaabka gurigeeda istaagtay. Qorshaha kaliya ee u yaallaa waa in ay qudha iska jarto. Haa nafteeda in ay goyso ayay go'aan ku gaadhay. Waxa kaliya ee ay u baahan tahay waa agabkii ay u isticmaali lahayd dilka nafteeda. Randa ma doonayso in ay saacad kale adduunka sii dul-joogto. Intii ay albaabka taagnayd ayay xasuusatay suntii xaafadda la keenay shalay, si loogu baabi'yo jiirka adeeggii madhiyay. Haa, waa fursadda ugu mudan ee ay helikarayso. Degdeg ayay u qaadatay deetana qolkeeda hoosta kasoo xidhatay. Daboolka inta ka qaaday ayay labada gacmood ku qabatay, deetana kor u qaaday ilaa ay afkeeda ku sintay. Khalaas! Way ku daysay.

Haa iyaduna waxay raacday saaxiibbadeed. Meel ay ku hadho ayay waysay. Way dhimatay! Dhimatay! Dhimatay!

DHAMMAAD